

# Kulanada Kobicinta Jefferson Park

NAQSHADA SKATEPARK • CUSBOONAYSIINTA BEACON MOUNTAIN • CUSBOONAYSIINTA GAROONKA JEFFERS

6:00 – 6:20 galabnimo Jiidda Ciyaaraha Beacon Mountain  
6:20 – 6:40 galabnimo Garoonka Ciyaaraha Jefferson Park  
6:45 – 8:30 galabnimo Naqshada Jefferson Park Skatepark

Seattle Parks and Recreation waxay kugu martiqaadaysaa adiga iyo qoyskaaga inaad ka soo qaybgashaan kobicinta fiican ee ka socota Jefferson Park. Inta hore kulan kasta Parks waxay la socodsiin doontaa bulshada horumarka dhiska oo waxay ururin doontaa fikradaha naqshada kamadanbaysta ah ee Beacon Mountain iyo jiidda ciyaaraha Garoonka Jefferson Park.

Kulanadu waxay u guuri doonaan kulan-hawleedyo si ay u gargaaraan naqshada skatepark cusub eek u dhex yaal Jefferson Park!

Culays-saaritaanka mashruuca skatepark waa inuu siiyo naqshada iyo dhismaha skate park cusub sida ku qeexan Qorshaha Citywide Skatepark Plan ee ay maalgalisay Parks and Green Spaces Levy. Skatepark waxa lagu dari doonaa qurxinta dhulka oo waxay ku ooli doontaa woqooyi-galbeed ee meesha waditaanka baabuurta. Mashruucan waxa lala dhisi doonaa garoonada kubadda kolayga iyo cusboonaysiinta meesha baabuurta la dhigto. Miisaniyadda mashruuca dhan waa \$1,000,000 iyo deeq dheeraad ah oo dhan \$10,000 oo ka timid Sub Pop Records. Garoonka kubadda kolayga iyo cusboonaysiinta meesha baabuurta la dhigto waxay ku iman doonaan miisaaniyad gooni ah.

Meel ku kaydso taariikhda 3 Arbaco ee kulanada  
**Abril 14ka - Maajo 26ka - Julaaay 14ka**  
JEFFERS ON PARK COMMUNITY CENTER, 3801 BEACON AVE. S.

## KULAN-HAWLEEDYADA SKATEPARK

Fadlan nagu soo biir kulanada soo socda si aad wax uga barato jardiinada fiican ee cusub oo aad uga qaybqaadato horumarka naqshada ee ka timid fikradaha waaweyn una socda naqshad farsamaysan. Kulan kasta wuxu ku taagnaan doonaa kii ka horreeyey taas danted fadlan iskuday inaad timaada dhammaan saddexda kulan.

### Abril 14: FIKRADAHA WAAWEYN EE SKATEPARK!

Xirfadyahanada naqshada ayaa soo jeedin doona fikradahooda hore ee la xidhiidha waxa ka dhigi kara skatepark si gaar ah, sida ay u dhexgalayso aragtida guud ee Seattle, iyo jardiinada weyn ee Jefferson Park. Fadlan la imow fikradahaaga waaweyn ee ballaadhan! Waxa kale oo aanu ku weydiin doonaa inaad keento muuqaalo, sawiro, iwm. Oo taageeraya fikradahaaga. Waxaanu soo saari doonaa kuwaas kulanka oo aanu uga tegi doonaa naqshadeeyayaasha.

### Maajo 26: HUFIDDA FAAHFAAHINTA EE SKATEPARK!

Naqshadeeyayaasha ayaa hufi doona naqshadaha ku salaysan ra'yiga bulshada, dib-u-firinta Parks, iyo taladooda aqooneed. Waxay soo jeedin doonaan naqshada hufan. Fadlan soo qaad ra'yigaaga si aad nooga gargaarto qaababka oo aanu ugu dhaqaaqino naqshada gebogebyanteeda.

### Juulaay 14: NAQSHADA KAMADANBAYSTA AH EE SKATEPARK!

Iyada oo ku salaysan kulanadii iyo dib-u-firintii hore, naqshada kama-danbaysta ah ayaa la soo bandhihi.

Dhammaan 3 Kulan ee Naqshada waxay ka dhici doonaan Jefferson Park Community Center,  
3801 Beacon Ave. S, 6:00 - 8:30 PM

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO LA XIDHIIDHA SKATEPARK LA XIDHIIDH:

Kim Baldwin  
Maareeyaha Mashruuca  
Seattle Parks and Recreation  
800 Maynard Avenue S. 3rd Floor  
Seattle, WA 98134-1336  
kim.baldwin@seattle.gov (206)615-0810  
<http://seattle.gov/parks/projects/jefferson/skatepark.htm>

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO LA XIDHIIDHA GREATER PARK LA XIDHIIDH:

Andy Sheffer  
Maareeyaha Mashruuca  
Seattle Parks and Recreation  
800 Maynard Avenue S. 3rd Floor  
Seattle, WA 98134-1336  
andy.sheffer@seattle.gov (206)684-7041  
<http://seattle.gov/parks/projects/jefferson/park.htm>

Nagu soo booqo [seattle.gov/parks](http://seattle.gov/parks)



"Creating community through people, parks, and programs."

SEATTLE PARKS  
AND RECREATION